



Empowering Legal Education

**KOBACA IYO
CAQABADAHA
HAY'ADAHA
CADAALADDA**

TUSMO

GOGOLDHIG

SOOYAALKA GARSOORKA SOOMAALIYA

DIB U HAWLGALINTA HAY' ADAHA FULINTA CADAALADDA DALKA

SOO KABASHADA WACYIGA BULSHADA

CAQABADAHA HAY' ADAHA GARSOORKA

GUNAANAD

TALOBIXIN

QORAY

Avv.Yusuf Abdullahi Hassan (Nuuxi) waa qareen iyo Qoraa, wuxuu ka baxay kulliyadda Qaanuunka ee Jaamacadda Ummadda (L.L.B) sidoo Kalena diyaarinaya shahaadada labaad (L.L.M) ee qaanuunka guud (Public Law), wuxuu muddo Sanado ah kasoo shaqeeyay horumarinta Sharciga, isagoo ahaa Madaxa cilmi-baarista ee hay'adda Ogaal Legal syndicate, waa Qoraha Buugga Sahayda Garyaqaanka isla markaasna ah Agaasimaha Machadka Ogaalx, wuxuu lasoo shaqeeyay Machadka Tababbarka Garsoorka iyo sidoo kale Guddiga Madaxabanaan ee dib u eegista dastuurka, kana qaybqaatay hawlaha dib u eegista dastuurka KMG. Wuxuu garyaqaanku leeyahay waraaqo Cilmi-baariseed oo kala duwan iyo qoraalo ku saabsan Sharciga.



Bashiir Yuusuf Qutbi waa cilmi-baare iyo Garyqaan, islamarkaasna ah Madaxa Horumarinta Akaademiyyadda ee Machadka Ogaalx Wuxuu haystaa shahaadada L.L.B iyo L.L.M oo uu ka qaatay Jaamacadda Muqdisho, iyo shahaadada cilmi-baaris sare oo uu ka qaatay Machadka Heritage. Qoraaladiisa cilmibaariseed waxaa ka mid ah: Doorka Nidaamka Garsoorka Soomaaliyeed ee Xeerinta Maxkamadaha iyo Doorka Dhallinyarada ee Dib-u-eegista Dastuurka. Wuxuuna sidoo kale ka qayb qaatay dadaaladda Wax ka bedelka Dastuurka.

Gogol Dhig

Garsoorka waa tiir kamid ah tiirarka 3da ah ee ka koobantahay dawladda casriga ah, Garsoorku waxa uu u taaganyahay xaqiijinta sarraynta sharciga, dhowrista isku dhaqidda xeerarka, ilaalinta xuquuqaha aasaasiga ah, dheelitirka hay'adaha dowladda, xalinta khilaafaadka iyo talaabo ka qaadida cidkasta oo jebisa sharciga. Yoolka Garsoorka waa in uu ku suntanaado hufnaan, sinnaan, daacadnimo, tayo adeeg-bixin, ixtiraamka xuquuqda aasaasiga ah iyo xaqiijinta sarraynta sharciga.

Soomaaliya kadib burburkii waxaa si dhib badan lagu dhisay qayb kamid ah hay'adaha fulinta cadaalada dalka iyada oo culays badan laga soo maray dib u hawl galintooda, caqabadaha ugu waaweyn ee markaa jirayna waxaa kamid ahaa, fahan yari dawladeed, jiho wareer ku aadan hab shaqaynta nidaamka dawliga ee casriga ah, amaan xumo, dhaqaalo la'aan, u qalmasho la'aan iyo dadkii aqoonta u lahaa garsoorka oo aan ku dhiiran gelista shaqada.

Markii maagalada Carta ee dalka Jabuuti dib loogu yagleelay Jamhuuriyaddii Saddexaad ee Soomaaliya sanadkii 2000, waxa la dajiyey Axdi-Qarameed Kumeelgaarka ah oo ay isku raaceen waftidii shirkaa taariikhiga ah ka soo qaybgashay, waxaana si wada jir ah loogu baaqay in dib loo dhiso hay'ad garsoor oo madax-bannaan.

Horaantii 2004 ayaa loo badelay nidaamkii guud ee dawlada dhexe mid federal ku meel gaar ah, balse caqabadihii haystay hay'ada garsoorka wax weyn kamay fududayn, in ay xukuumadihii isbedbadalayay soo kordhiyeen culaysyo hor leh mooyee, sida xarigii gudoomiyihii maxkamada sare oo tusaale u ah xaalada aadka u liidatay ay laanta garsoorka wadanku la dhibaatoonaysay xilligaa iyo aragti yaradii ka haysatay xukuumda nidaamka cadaaladeed ee wadanka¹.

Caqabadahan markii laga soo tago horaantii sanadii 2014 waxa ay ahayd sanad ay isbadalo xoogan ku dhaceen garsoorka wadanka, sanadan waxaa xoogaystay oo yeeshay barbilow hagaagsan garsoorka caasimada wadanka oo u taagan in uu yahay garsoorka guud ee wadanka maadaama ay halkan ku shaqayso maxkamadii sare ee wadanka oo iyadu metelaya garsoorka wadanka oo idil².

Dhanka maamulada marka laga soo tago Somaliland, Garsoorka Dowlad gobaleedka Puntland ayaa ah mid waqti fog la aasaasay, oo ka horeeyay dhammaan Dowlad Goboleedyada kale ee dalka, Puntland waxa ay jirtaa 26 sano iyo dheeraad, marka la eego habshaqaynta garsoorka maamulka, waxaad ka dheehan kartaa in mudadaas ay jirtay Puntland lagu qabtay wax badan oo aan sahlanaayn.

Dhanka kale waxaa jira guulo la xusi karo oo ay samaysay hay'adda garsoorka ee wadanka oo ay ka mid yihiin, hirgelida iyo shaqaynta maxkamadaha si dhamaystiran, hawl gelida dhallinyaro

¹ Transitional Federal Charter. (2004). Article 63. Mogadishu.

² Bashir, Y. (2025). *Impediment hindering establishment of Somalia's JSC. Journal of International Law ESS.*

aqoonyahano ah oo firfircoon, wacyiga bulshada oo soo kab maya, Kobaca barashada Qaanuunka iyo ka faa'adaysiga baraha isgaarsiinta, kobaca xirfadeed iyo aqooneed ee hawlwadeenada hay'adda iyo arimo kale oo muhim ah ayaa saldhig u ah kobaca Hormarineed ee Garsoorka wadanka ee ay daraasadani diiradda saari doonto.

1.0 Hordhaca Sooyaalka Garsoorka Soomaaliyeed

Taariikhda garsoorka soomaaliya waa mid hodan ah oo isbedelo badan leh, iyadoo lagu dhisay isbeddelo siyaasadeed iyo bulsheed. Bulshada Soomaaliyeed waxay markii hore ku tiirsaneyd sharciyada dhaqanka, oo loo yaqaan "Xeer dhaqameed" kuwaas oo maamuli jiray khilaafaadka iyo xiriirka bulshada, hadaba sooyaalka garsoorka waxaan u qaybinaynaa ilaa saddex qaybood oo aan faahfaahin doono.

1.1 Qaadashadii Xurnimada Ka Hor

Ka hor guumaysataha reer yurub, Soomaalidu waxa ay la haayeen nidaam garsoor ay yaqaanaan oo ay ku qanacsanyihiin, in kasta oo aan dawlad kawada dhaxaysa oo shuruuc iyo nidaam fulisaa aysan jirin hadana waxa ay Soomaalidu u degenayd beelo, beeluhuna waxa ay isku maamuli jireen xeer dhaqameedyo ay iyagu horumariyeen iyo shareecada Islaamka oo gooni ahayd. Nidaamyadaan sharci waxa ay beeluhu u adeegsan jireen si ay islayaqaanaan oo aan cidna lagu dulmayn, sidoo kale shakhsigu wuxuu awood u la haan karay in uu kala doorto ku xukminta shareecada ama xeerka. Shareecada waxaa u garsoor iyo nooc fulineed u ahaa culimada buuniga ku ah halka xeerkana ay odayada garyaqaanada ahi hormuud u ahaayeen³.

Markii uu yimid guumaystihii reer yurub dhulka Soomaaliyeed waxaa kala qabsaday sadex dawladdood oo kala nidaam garsoor iyo luuqad duwan, waxa ayna arintaasi keentay isku murgid garsoor. Reer yurub waxa ay la yimaad nidaamyo garsoor oo iyaga u gaar ah halka ay u yimaadeen dad horay wax u lahaa oo yaqaanay sida ay u kala qaan iyo gar baxaan, waxa ayna isku dayeen in ay kooda fuliyaan, midaas oo keentay jahawareer baaxadweyn, inkasta oo markii dambe la garawsaday in la isku barbar wado sedexda nidaam iyada oo xooga la saarayo midkan reer yurub. Arintaasi waxa ay keentay xoogaa is fahan ah in uu dhasho, intaa ka dib bulshadii Soomaaliyeed waxa ay aqbaleen in ay arrimahoodii iyaga oo hoos iskaga wata ay hadana aqbalaan maxkamadihii guumaystuhu uu soo kordhiyay⁴.

Xilligan dhulka Soomaaliyeed waxaa kala guumaysanayay sedex dawladeed ee kala ah Faransiis, Talyaani iyo Ingriis, inta badan ee dhulka oo ay ugu muhiimsan yihiin Gobaladii waqooyi ee Jamhuuriyada Soomaaliya waxaa haystay Ingriis halka kuwa koofurtana uu haysatay Talyaani. Hadaba mid walba oo iyaga ka mid ah waxa uu ka hirgaliyay dhulka uu haystay nidaamkiisa Garsoorka oo ay barbar socdaan xeer dhaqmeedyadii deegaanka iyo shareecada Islaamka. Caqabada ugu weyn ee xilligan jirtay marka laga soo tago in guumaysi lagu jiray waxa ay ahayd fahan li'da iyo la jaanqaad la'aanta nidaamkan guumaysi iyo is hortaaga uu ku ahaa in ay bulshadu

³ The legal system of Africa Series, general auditor Kenneth R. Redden and others

⁴ The legal system of the Somali Democratic Republic by Haji N. A. Noor Muhammad

si daah furan u adeegsadaan nidaamyadoodii ay yaqaaneen, waxaa kale oo caqabad ahaa isbarbar socoshada sadex nidaam garsoor oo ahayd jiho wareer xoogan⁵.

1.2 Qaadashadii Xurnimada Ka Dib.

Neecoow xurnimo iyo midowgii gobolladii Ingiriiska iyo Talyaaniga ay kala gumeysan jireen ee sanadkii 1960-kii kadib, garsoorka Soomaaliya waxa uu wajahay caqabado dhanka isla-jaanqaadka ah oo ka dhashay arrimihii is barbar socday ee ay guumaystayaashii ka tageen iyo caqabad cusub oo uu keenay midawga labada gobal oo ah Maadaama labada gobal ee midoobay ay kala haysteen laba nidaam garsoor oo kala duwan, kuna qoran laba luuqadood oo aad u kala badalan, waxaa khashay jihowareer xoogan oo hor leh. Waxaa lagu xaliyay jihowareerkii nidaam garsoor isku waafaqidii xeerkaa midawga labada gobal (act of union)⁶ balse waxaa si dhamaystiran ula tacaalay arintaa xeerka Nidaaminta Garsoorka ee la ansixiyay sanadkii 1962-dii. Intaa wixii ka dambeeyay nidaam garsoor oo mideysan ayay ku dhaqmeen dowladihii rayidka iyo militariga ee dalka ka soo arrimiyay ilaa laga riday xukunkii dowladdii militariga sanadkii 1991.⁷

1.3 Burburkii Ka Dib

Burburkii dawladii dhaxe ee wadanka ama xukuumadii militariga ka dib, waxaa wadanka ka dhacay dhibaatooyin farabadan, waxaa ka dhashay in loo kala baxo beelo oo uu ruux walba ku laabto deegaanka ay beeshiisu degto si uu nabadgalyo nafeed u helo, intaan ka dib waxaa dhacday in ay meelaha qaar ka dhashaan maamulo sida gobalada waqooyi oo la baxay Somaliland oo ku dhawaaqay in ay yihiin dawlad madaxbanaan 1991⁸.

Sidoo kale maamulka putland oo isaguna gadaal ka dhashay 1998⁹, inkasta oo aysan sheegan madaxbanaani halka wadanka intiisii kale ay ka sii jireen colaad beeledyo. Dawlad dhexe oo wadanku uu yeeshana waxa ay noqotay riyo u qaab eg mala awaal, dadaalo daba dheeraaday ka dib waxaa lagu guulaystay in xaddi farabadan oo isugu dhan bulshada Soomaaliyeed la geeyo magaalada Carta ee wadanka Djibouti, horaantii sanadkii 2000 si ay u wada hadlaan oo ay isugu dayaan in ay dhistaan dawlad loo dhanyahay.

Dadaal dheer kadib Waxa lagu guulaystay dajinta Axdi-Qarameed Kumeelgaarka ah oo ay isku raaceen inta badan wafdigii shirkaa taariikhiga ah ka soo qeybgalay, waxaana si wada jir ah loogu baaqay in dib loo dhiso hay'ad garsoor oo madax-bannaan, taas oo ay weheliyaan hay'adaha sharci-dejinta iyo fulintu, iyaga oo saddexdaa hay'adood ugu yeeraya "laamo dawladeed oo siman". Axdigu waxa uu qeexay tallaabooyin cadcad oo dib loogu eegayo nidaam-qarameedkii hore ee garsoorkii wadanka ee naga burburay.

⁵ Book of legal clinic manual author Birmad Egal at Mogadishu University Legal clinic

⁶ Law. No. 5 of January 31st in 1961

⁷ Habka Nidaaminta Garsoorka Somaliya, Somalia Public Agenda, may-2018.

⁸ Justice-Report-Jan-6. (2021). *Justice-Report-Jan-6*-. Mogdishu: Heritage institute for policy studies.

⁹ Ibid

Horaantii 2004 ayaa loo badelay nidaamkii guud ee dawlada dhexe mid federal ah oo ku meel gaar ah, balse wax weyn kumayna kordhin tabartii laanta garsoorka wadanka in ay caqabada hor leh xukuumadu hurmuud u noqday mooyaane, sida xarigii gudoomiyihii maxkamada sare oo tusaale u ah xaalada aadka u liidatay ay laanta garsoorka wadanku la dhibaatoonaysay xilligaa iyo aragti yaradii ka haysatay xukuumda nidaamka cadaaladeed ee wadanka¹⁰.

2009 culeesyo farabadan iyo dagaalo qaraar ka dib badelida xukuumadii wadanka ka talinaysay, waxaa la dareemay xoogaa isbadal xagga garsoorka wadanka ah iyo kor u sookac tartiibtartiib ah. Isbadalada yimid waxaa ka mid ahaa dhisidii golaha sare ee garsoorka ee KMG ahaa iyo in dib loo hawl galiyay qaar ka mid ah maxkamadihii magaalada muqdisho. Sidoo kale waxaa soo kordhay in lagu guulaystay in Axdigii federaalka ee KMG ahaa loo bedelay Dastuur ku meel gaar ah oo dhaqangalay horaantii bishii Agoosto 2012.

Dastuurkani waxa uu gebi ahaanba bedelay qaabdhismeedkii soo jireenka ahaa ee garsoorka wadanka isaga oo ka dhigay sadex la kab oo kala ah; Maxkamada Dastuurka, Maxkamadaha heer federal iyo heer dawlada xubnaha ka ah dawlada federaalka¹¹.

Halkan waxaa la dhihi karaa waxaa ka bilawday casri dahabiga nidaamka garsoorka wadanka burburkii ka dib, maadaama si fiican loo saldhigay, ayna soo noqotay awoodii laanta garsoorka iyo adeegyadii bulsho ee maalin laha ahaa.

Markii heerkani la soo gaaray waxaa toos u bilawday soo noolaanshiyo iyo sawirasho nidaam dawladeed oo dib u sara kaca, garsoorka wadankuna waxa uu qeyb mudnaan leh ka ahaa dib u kabashadaan bulsheed iyo dawladeedba, inkasta oo ay ku gadaamnaayeen wax walba oo lagu tilmaami karo in ay yihiin caqabad, illaa iyo hadana ay jiraan caqabado waaweyn oo laga dheehan karo hab shaqaynta nidaamka garsoor ee wadanka, waxaa tusaale kuugu filan in aysan dhaqangelin 12 sano ka dib qaabdhismeedkii garsoor ee Dastuurka ku meel gaarka ahi jideeyay¹².

In kasta oo ay hawlaha maalin laha ah ee garsoorku socdeen iyada oo la dabaqayo nidaamkii garsoor ee uu jidaynayay xeerkii nidaamka garsoorka 1962, maamulada qaar ee wadankuna ay samaysteen wax loo fahmi karo in uu yahay nidaam garsoor ka yara duwan kii 60-kii.

2.0 Dib u Hawlgalinta Hay'adaha Fulinta cadaaladda wadanka.

Markii maagalada Carta ee dalka Jabuuti dib loogu yagleelay Jamhuuriyaddii Saddexaad ee Soomaaliya sanadkii 2000, waxa la dajiyey Axdii-Qarameed Kumeelgaarka ah oo ay isku raaceen kumannaan ka mid ah waftidii shirkaa taariikhiga ah ka soo qaybgashay, waxaana si wada jir ah loogu baaqay in dib loo dhiso hay'ad garsoor oo madax-bannaan, taas oo ay weheliyaan hay'adaha sharci-dejinta iyo fulintu. Iyaga oo saddexdaa hay'adood ugu yeeraya "laamo dawladeed oo

¹⁰ Transitional Federal Charter. (2004). Article 63. Mogadishu.

¹¹ Articles (105 - 109) of the Provisional Constitution

¹² the Somali legal systems. (1972). *the legal system of Somali Democratic Republic*. Virginia, USA: The Michie Company.

siman”. Axdigu waxa uu qeexay tallaabooyin cadcad oo dib loogu eegayo nidaam-qarameedkii hore ee garsoorka ama dib loogu howlgelinayo qaabdhismeedkii garsoorkii dawladii burburtay.

Hadaba waxa aan isla eegaynaa habkii dib u kabashada iyo caqabadaha guud iyo kuwa gaar ee hay’adaha cadaalada wadanka oo aan ka xusidoono;

- **Wasarada cadaaladda**
- **Maxkamadaha**
- **Booliiska iyo Asluubta**

2.2 Wasaaradda Cadaaladda

Dooraka wasaaradda cadaaladda kaga aadan garsoorka waa in ay ku hogaamiso dhinaca siyaasada islmarkaana ay ku difaacdo goloyaasha fulinta sidoo kalana ay miiska geyso sharciyada iyo baahiyaha hay’ada garsoorka kaga xiran hay’adaha kale ama laamaha kale ee dowlada, in ay dowladan u qaadatay sidii loo baahnaa iyo in kale, waydiintan dadkii aan hordhignay waxa ay ka sinaayeen, in ay wasaaraddu aad uga gaabisay howsha, fahanka in ay kaalinteeda aqoonsatana ay aad u hoosaysay oo ay inta badan wasaaradani ku mashquulsanayd howlo uusan waajib ka saarnayn halka ay dayacday kuwii iyada sida goonida ahaa ugu waajibay.

Si kasto oo ay ahaataba waxaa la fahmi karaa in ay dhibaatooyin culus la wadaagaysay, hay’adaha kale ee dowliga, inta badana ay rafasho iyo isku dayo farabadan samaynay si ay wax uun iskugu daydo.

Xil iska saarida shaqada saran wasaarada ee ah in ay hay’ada Garsoorka u qaabilsantahay arrimaha siyaasadda iyo ku metalidda fadhiyada golaha fulinta, waxaa la dhihi karaa way soo wanaagsanaysaa oo wasaaraduna dadaal aan yarayn ayay ku bixinaysaa in ay xasiliso gaabisyadeedii hore, waxaana dhaqdhaqaaqyadeeda dambe laga dheehan karaa in ay isku dayayso, in ay siyaasadda Garsoorka iyo guud ahaan cadaaladda dalka wax ka qabato.

In kasta oo ay caqabada fulin la’aanta arrimaha laga go’aan gaaro ay kala simantahay hay’adaha dowlada oo idil, oo ay ugu horeeyaan garsoorka oo la dhihi karo caqabadaha waawayn ee haysta ayay fulin la’aantu ugu horaysaa, dhanka kale waxaa jiro isku dayo dib u habayn nidaamka cadaalada oo ay wasaaradu hurmuud ka ahayd, oo loo aqoonsan karo in ay ahaayeen, jiheeyayaal wax badalay. Waxaa ugu muhiimsan shirarkaa;

- shirweynihii dib u eegista cadaalada ee 2013, shirkan oo ka dhacay magaalada Muqdisho, waxaa ka soo qeybgalay marti kala duwan oo gaaraysay 200 oo qof, waxaana diirada lagu saaray shirkan caqabadaha waaweyn ee hortaagan nidaamka cadaalada wadanka iyo sida xal loogu heli karo.
- Waxyaabihii shirka ka soo baxay waxaa ugu muhiimsanaa, in la dhiso gole adeeg garsoor, maxkamada dastuurka iyo guddiga xuquuqda aadanaha. Balse in kasta oo

sharcigii lagu yagleeli lahaa hay'adahan la sameeyay intooda badan hadana waa lagu guuldaraystay in la dhidibada loo taago hay'adaha muhiimka ah.

- Shirweynihii dib u eegista cadaalada ee Jowhar 2018, shirkan oo ka qabsoomay magaalada Jowhar, waxaa diirada lagu saarayay nidaamka federaalaynta hanaanka cadaalada wadanka oo looga golahaa in lagu daro hanaanka dib u eegista dastuurka ee socotay, waxaa shirkan ka soo qeybgalay dhamaan wasaaradaha cadaalada ee dowladaha xubinta ka ah dowlada federalka, maamulka gobalka banaadir iyo wasaarada cadaalada wadanka.
- Waxyaabihii muhiimka ahaa ee shirka ka soo baxay waxaa ka mid ahaa; in heshiiskan siyaasadeed lagu daro dib u eegista dastuurka wadanka, in nidaamka garsoor ee wadanku sidiisa sii ahaado inta laga dhamaystiraayo dib u eegista dastuurka, in maamulka gobalka banaadir sidiisa iska sii ahaado inta maqaamka magaalada laga go'aan gaaraayo iyo in la sameeyo sharciga nidaamka garsoorka oo waafaqsan hanaanka federaalka.¹³

Sidaan horay u soo xusnay caqabadaha haysta wasaarada waxaa ka mid ah fulin la'aan go'aameed oo aysan iyadu inta badan awood kama dambays ah u lahayn, sidii caadada ahayd go'aanadana waxba lagama suurogelin, oo wali sidoodii ayay u rabaan in wax looga qabto.

2.1 Maxkamadaha

Soomaaliya kadib burburkii waxaa si dhib badan lagu dhisay qayb kamid ah hay'adaha garsoorka dalka dib u hawl galintooduna way cuslayd, caqabadaha ugu waaweyn ee markaa haystayna waxaa ugu horreyay amaanka oo aad u xumaa, dhaqaalo xumo, wadanka intiisa badan in uu dagaal ku jiray iyo dadkii aqoonta u lahaa garsoorka oo aan diyaar u ahayn in ay shaqo galaan. Sababahaas dartood maxkamadaha wadanka oo idil lama hawl galin Karin ee marba midii la awoodo ayaa la furayay, nidaamkani waxa uu ahaa hab cajiib ah oo nolosha qeybaheeda kala duwan dib u soocelinayay maadaama xaalada wadanku ay aad u il-darnayd.

Caqabadaha waxaa intaa sii dheeraa in ku qanacsanaanta nidaamka garsoor ee dawliga ahi uu aad u hooseeyay bulshaduna ay u arkaysay maxkamada wax laga mudanyahay oo aan qiimo badan u lahayn. Soo kabashada nidaamka garsoor wadanku way ka dambaysaa, waxaana sabab u ah ku kala dambaynta caqabadaha amni ee wadanka.

Gobolka banaadir, ku soo baraarugii dib u yagleelida dowladnimo ee wadanka burburkii ka dib 2000 madaxweyne C. Qaasin uma suurogelin in uu saldhigto oo uu ka shaqaysiiyo nidaamkii dawladeed ee buuga axdi qarameedka loo bixiyay ugu qornaa. Nidaamkii salka u ahaa nidaamkan federal ee hadda jira ee la doortay 2004 madaxweynana uu ka noqday Cabdullahi Yusuf wax la

¹³ Heritage institute, 2021. "dib u dhiska Nidaamka Cadaaladda Soomaaliya ee Burburay" [Justice-Report-Somali-Jan-6-.pdf \(heritageinstitute.org\)](https://www.heritageinstitute.org/Justice-Report-Somali-Jan-6-.pdf)

taaban karo uguma suurogelin dib uga shaqysiinta garsoorka magaalada caasimada, inkasta oo uu dhinaca kale ku guulaystay in uu yimaado xukuumadiisiina uu keeno magaalada muqdisho. Balse labadaan nidaam waxa ay ka sinaayeen in ay wateen nidaam garsoor oo warqado ku qoran, gudoomiyaal maxkamadana ay magacaabi jireen.

Intaa ka dib waxaa la oran karaa horraantii sannadkii 2009, markii madaxweyneha dawladda fedderaalka kumeelgaarka ah loo doortay Shariif Shiikh Axmed, ayaa waxaa la qaaday tallaabooyin la taaban karo oo dib loogu dhisayo nidaamka garsoor ee dalka markii ugu horreysay tan iyo dagaalladii sokeeye madaxweyne Shariif, waxa uu si kumeelgaar ah u aasaasay Golaha Adeegga Garsoorka (JSC). Waxa uu isku dayay waxna uga suurogalay dib u shaqaynsiinta nidaamkii maxkamadaha dadweyne ee magaalada muqdisho iyo qaar ka mid ah gobolada wadanka¹⁴.

Xilligan ka dib waxaa si tartiib-tartiib ah u soo noolaanayay nidaamka garsoor ee wadanka waxa uuna caqabadaha waaweyn la qabay laamaha kale ee dawlada, garsoorkuse wuu uu nuglaa maadaama uusan haysan kaalmada iyo taageerida caalamiga ah ee ay helaan labada laamood ee kale, amniguna waxa uu ahaa dhibaato udub dhexaad ah marwalba, hay'adaha garsoorka iyo dadka u shaqeeyana waa la beegsanayay, waxaana dhacay dhacdooyin amni oo waawaayn horaantii isku dayga dib u kabasho ee garsoorka caasimada sida, qaraxii Sanadii 2013 lagu qaaday Maxkamadda Gobolka Banaadir oo gaystay khasaaro nafeed iyo mid hantiyeedba.¹⁵

Khasaraaha marka laga soo tago dhibaataadani waxa ay gogol xaar u noqotay in ay hay'adaha caalamiga ah ka qeybqaataan dib u kicinta garsoorka gobalka iyo midka guud ee wadanka. Dhacdooyinkii wajiga garsoorka magaalada muqdisho wax ka bedelay waxaa ka mid ahaa;

In ay hay'adaha Qaramada Midoobay ee UNDP iyo UNISOM ay Wasaarada Cadaaladda ee Soomaaliya ka kaalmeeyeen hawlo badan oo ay ugu muhiimsanaayeen, dhismaha maxkamada gobalka oo ay u dhamaystiranyihiin agabka amni ee kala duwan iyo tababaridda shaqaalaha oo isugu jira heer kasta. Dhismihii xilligaa la yagleelay waxaa deggan oo kuwada shaqeeyo xarumaha muhiimka ah ee garsoork sida: Maxkamadda Sare, X. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadda Gobolka Banaadir¹⁶.

Xafiiska Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM) ayaa si wayn u soo dhaweeyay lix gabdho oo loo qaatay xeer ilaalinta sanadii 2015, maqaal lagu daabacay bogga Bogga hay'ada ayaa lagu sheegay in ay tahay tallaabo taariikhi ah oo loo qaaday dhanka cadaaladda Maadaama tan iyo burburkii dowladii dhexe ee 1991 ayna jirin dumar kamid noqday xafiiska xeer-ilaalinta qaranka¹⁷. Markii laga soo tago sara u kacaa uu samaynayay garsoorka gobalka banaadir oo matalaad iyo

¹⁴ Heritage institute, 2021. "dib u dhiska Nidaamka Cadaaladda Soomaaliya ee Burburay"

¹⁵ UNISOM, 10 sep 2015, Maxkamadda Gobolka Benadir Oo laga furay Muqdisho.

[Maxkamadda Gobolka Banaadir oo laga furay Muqdisho | UNSOM \(unmissions.org\)](https://www.unmissions.org/somalia/gobolka-banadir-oo-laga-furay-muqdisho)

¹⁶ UNISOM, 10 sep 2015, Maxkamadda Gobolka Benadir Oo laga furay Muqdisho.

¹⁷ UNSOM, 4-May 2015-SOMLIA'S FIRST FEMALE PROSECUTORS CHANGE THE FACE OF JUSTICE.

[Somalia's first female prosecutors change the face of justice | UNSOM \(unmissions.org\)](https://www.unmissions.org/somalia/somalia-s-first-female-prosecutors-change-the-face-of-justice).

muraayad laga dheehdo u ahaa garsoorka wadanka oo idil, hadana waxa uu wajahayay xaalado adag, waxa uuna ku shaqaynayay duruufo culus oo ay ugu waynaayeen aminiga iyo wacyi la'aanta bulsho.

Garsoore xaladan ku soo shaqeeyay ayaa sheegay “ Ma ahayn wax sahlan in xilligaas la noqdo garsoore ama xeer-ilaaliye laakiin duruufo dhaqaale oo qof kasta haysatay ayaa keeneysay in shaqadii banaanba uu galo isla markaana uu ka raadsado qututul yoomkiisa” sidoo kale “ waxaan u shaqeeynayay si adag oo daacad ah balse bulshada waxay naga aaminsanaayeen si kale, waxaan shaqada soo gali jirnay xilli hore waxaanna ka bixi jirnay xilli dambe, iyada oo ay jirto digniino Amni oo isdaba joog ah”.¹⁸

Hay'adda Transparency international(TI) oo garsoorka Soomaliya ee xilligaa ka hadlaysa ayaa tibaaxday “Kadib dhicitaan dowladda Soomaaliya ee 1991 Soomaliya waxay ku dhaqmaysaa Xeer dhaqameedka iyo Shareecada islaamka si ay ugu xaliyaan isqabadyadooda, way adkayd in xilligaas la fuliyo xeerarka ay soomalidu ku dhaqmaan sidoo kale ma jirin xukun Maxkamadda ka soo bixi jiray oo xilligaa la dhaqan galin jiray sababta oo ah ammarada Maxkamadduhu ma ahayn kuwo loo hogaansamo”.

Caqabadahan markii laga soo tago horaantii sanadii 2014 waxa ay ahayd sanad ay isbadalo xoogan ku dhaceen garsoorka wadanka, isbadaladaas oo isugu jiray kuwo togan iyo taban ba sida kala diristii lagu sameeyay golahii adeega garsoorka ee KMG ahaa iyada oo lagu sababeeyay in la dhisaayo gole adeeg garsoor oo wafaqsan DKMG, inkasta oo la diyaariyay sharcigii lagu dhisi lahaa hadana ma suurogelin dhisidii goluhu, sanadan waxaa xoogaystay oo yeeshay barbilow hagaagsan garsoorka caasimada wadanka oo u taagan in uu yahay garsoorka guud ee wadanka maadaama ay halkan ku shaqayso maxkamadii sare ee wadanka oo iyadu metelaysa garsoorka wadanka oo idil¹⁹.

Dhanka kale waxaa iyadana xusid mudan in maamulka putland oo ahaa garsoorkiisu mid ka horumarsan garsoorka maamulada kale maadaama uu soo jiray waqti dheer inkasta uu laftirkiisu wajahayay caqabado ay ugu cuslayd dhaqaalo xumo balse sida kale ahaa garsoor awood u leh bixinta adeega garsoor ee ay sida maalin laha ah ugu soo doontaan bulshadu. Halka Somaliland oo iyadu madaxbanaani sheegatay ay xilligan la hayd garsoor awood u leh in uu adeeg la isku halayn karo bixiyo ayna u dhamaystiran yihiin inta badan baahiyihiisa sharci. Halka maamulada kale ee wadanku ay ku jireen qalalaaso siyaasadeed iyo dagaalo sokeeyo, inkasta oo ay arintan barbarsocotay hirgelinta nidaam garsoor oo ku xiran kan federalka ee muqdisho joogay.

Daalaa dhacaas ayay howsha garsoor ee wadanku ku soo socotay, marka la fiiriyo sanadadii 2015 iyo 2016 ma jirin kiisas badan oo ay maxkamaduhu ka garnaqi jireen, balse waxaa guul ahayd in la soo gaaray heer laga fikiri karo noocyada dambi ee maxkamadaha wadanka soo gala iyo jaadadka aan inta badan la arag, dambiyada aan xilligan xeerilaalintu soo eedayn jirin aadna ugu

¹⁸ La warayste, April-2024

¹⁹ Bashir, Y. (2025). *Impediment hindering establishment of Somalia's JSC. Journal of International Law ESS.*

badnaa wadanka waxaa ka mid ahaa, sida lagu cadeeyay warbixino ay hay'ado caalami ah sameeyeen, kuwa ku saabsan Lacag Dhaqidda “Money Laundering” oo ahaa illaa hadana ah dambiyada ugu waaweyn dhinaca maaliyada ee ka dhaca Soomaaliya. Waxaa sidoo kale aad u xooganayd eeda ah in uu garsoorka wadanka guud ahaan caqabadaha haysta ay ugu xooganayd musuq aad u baahay.

11 sep 2019 waxaa lagu tilmaami karaa in ay ahayd markii ugu horaysay burburkii ka dib ee la qaado imtixaan furan oo loogu tartamo boosas shaqo oo ka banaanaaday hay'ada garsoorka wadanka, waxaa imtixaankan u fariistay in ka badan 210 Garyaqaan kuwaas oo u tartamayay 40 boos oo ah Garsooreenimo. Gudoomiyaha Maxkamadda Sare Baashe Yuusuf Axmed, ayaa sheegay in si barax la' loo wajihi doono arinkan qeybna ay ka tahay kobcinta horumarinta garsoorka dalka si loo baahiyo Adeega Cadaaladda.²⁰

Sidoo kale 2021 ayaa laqaatay xeerilaaliyayaal ku yimid imtixaan furan, waxaa kale oo 20-9-2023 imtixaan u fariistay in kabadan 487 garyaqaan Soomaaliyeed oo u tartamayay 50 boos oo isugu jiray Garsooreyaal iyo Xeer-ilaaliyeyaal heer Federaal ah.²¹ laga soo bilaabo sanadii 2019 waxaa muuqanaysa in kobac la taaban karo uu ka jiro garsoorka wadanka, daah furnaanta shaqaalaysiintuna ay aad u sarayso heer federal iyo heer maamul gobaleedba.

Dhanka maamulada marka laga soo tago Somaliland, Garsoorka Dowlad gobaleedka Puntland ayaa ah mid waqti fog la aasaasay, oo ka horeeyay dhammaan Dowlad Goboleedyada kale ee dalka, Puntland waxa ay jirtaa 26 sano iyo dheeraad, marka la eego habshaqaynta garsoorka maamulka, waxaad ka dheehan kartaa in mudadaas ay jirtay Puntland lagu qabtay wax badan oo aan sahlanaayn balse gaabis farabadanna uu jiro.

Caqabadaha ku hareeraysnaa waxaa ka mid ahaa dhaqaalo xumo baahsan, aminga oo liitay iyo dalka intiisa kale oo dagaal ku jiray. Muddadaan maamulka Puntland waxaa u suurogalay samaysashada xeerar muhim ah iyo kuwo ay hormarisay kuwaas oo ahaa kuwo ay baahi badan u qabtay kuna saabsanaa dhibaatooyin markaa soo kordhay oo ka dhashay dagaaladii iyo burburkii dowladii dhexe, waxaana kamid ah, Xeerka la dagaalanka Argagaxisada, Xeerka la dagaalanka Burcad-Badeeda, xeerka ka hortagga Kufsigu, xeerka caruurta, xeerka qoyska iyo kuwo kale.²²

Guud ahaan Gobollada Puntland waxay imika leeyihiin xarumo tiro fiican leh oo sahlaya in lagu socodsiiyo adeega cadaaladda ee bulshada, inkasta oo ay jiraan caqabado dhowr ah oo ay ka mid yihiin in adeega garsoor ee maamulku uuna wali ugu baahin inta badan deegaanadda maamulka sidii loo baahnaa.²³

²⁰ Imtixaanka Ogaal Legal Syndicate, 11 sep 2019,

²¹ <https://www.facebook.com/share/p/WjrhjufNdDLMBt1/?mibextid=WC7FNe>

²² Salim Saed, 2018, THE STATE OF JUDICIARY IN PUNTLAND STATE OF SOMALIA.

²³ Human Rights Security within the Criminal Justice System in Puntland: The Case of Bosaso, Garowe, Galkacyo and Qardho Districts) 2018.

<https://www.kaalo.org/wp-content/uploads/2019/04/Baseline-Study-FINAL-7.pdf>

Somali public agenda, Habka Nidaamka Garsoorka Smaaliya, 2018

Garsoorka dowlad goboleedyada kale waxa ay la soo jaanqaadeen ka bixidii uu wadanku ka gudbay kumeel gaarnimada ee uu noqday federalka dhamaystiran, inkasta oo uu garsoorkoodu ka soo wanaagsanaanaayo, hadana waxaa jiro caqabado, walina si fiican uma saldhigan, balse, waxay ku jiraan dadaal soo kabasho iyo isku day adeeg bixin²⁴.

Ugu dambayn hadaan si guud u fiirino habshaqaynta maxkamadaha guud ee dalka waxaa noo muuqanaya in kobac aad u fiican ay sameenayaan muddoyinkii u dambeeyay.

2.1.1 Doorka Machadka Tababbarka Garsoorka

Machadka Tababbarka Garsoorka wuxuu ku jiraa hay'adaha loo aas'aasay xoojinta iyo tayaynta garsoorka, waxaana la aasaasay July 2021, ujeedka loo yagleelayna waa in uu noqdo xarun Tababbar iyo cilmi baaris Madaxbanaan oo Garsoorka Dalka uu Leeyahay si uu u guto kaalintiisa ku aadan sugidda Cadaaladda iyo sarreynta Sharciga.²⁵

Gudoomiyaha Maxkamadda sare oo ka hadlay shirkii lagu yagleelay Machadka Tababarka Garsoorka ayaa jeediyay hadalkan kooban “iyada oo la tixgelinayo baahida tababbar iyo kobcin ee xirfadda garsoorayaasha, xeer-ilaaliyayaasha iyo hawl-wadeennada garsoorka ayaa waxaa noo suurto gashay in la aas'aaso Machadka Tababarka Garsoorka Soomaaliya”²⁶

Mudada gaaban ee uu jiro Machadka Tababbarka Garsoorka waxa uu isku xilqaamay in uu daboolo baahida xarga goosatay ee ka dhexjira hay'adda garsoorka ee heer federal iyo heer dowlad goboleedba.

Machadka waxa uu safari ku kala bixiyaa dhammaan dowlad goboleedyada wadanka si loo gaarsiiyo adeegyada mac-hadka oo ay ka mid yahiin in uu u qabto tababbaro kala duwan oo la siinayo xubnaha kala duwan ee garsoorka isagoo machadka uu sanad walba dhowr mar uu u safro maamul goboleedyada si loo hirgaliyo yoolka Machadka ee haqabtirka baahiyaha garsoor ee heer federaal iyo heer dowlad goboleed.

Balse waxaa muuqata inuusan mac-hadkani awood buuxda u la hayn haqabtirka baahiyaha jira, kuna koobnaaday magaalada muqdisho, awoodna u yeelan waayay inuu noqdo mac-had tababbar oo madaxbanaan, isagana soo koobmay inuu noqdo waax ka mid ah Maxkamada sare ee dalka.

2.4 Asluubta iyo Booliska

Marka aan ka hadlayno hay'adaha cadaaladda ama hay'adaha fulinta sharciga waxaa heerka ugu hooseeya ugana sarreeya ku jira booliiska iyo Asluubta oo ah halka ay cadaaladu ka bilaabato iyo halka ay ku dhamaato, muwaadinkuna uu ka sawiran karo kalsoonida uu ku qabi karo nidaamka cadaaladeed ee wadanka iyo heerka uu gaarsiisanyahay wacyiga saraynta sharci ee wadanka.

²⁴ <https://somalipublicagenda.org/hababka-nidaaminta-garsoorka-soomaaliya/>

²⁵ Sharciga lagu aasaasay Machadka Tababbarka Garsoorka, 2021.

²⁶ Warbixinta Machadka Tababbarka Garsoorka, jan, 2022.

<https://www.facebook.com/share/v/jCBDs79JCG4asizV/?mibextid=w8EBqM>

Booliiska Soomaaliyeed waxaa aasaasidiisii loo celin karaa xilligii guumaysiga, inta aan la qaadan xurnimada wadamadii joogay wadanka, waxa uu mid walba lahaa qeybo ciidan soomaali ah oo ay u isticmaalayeen sida Booliiska una adeegsanayeen danahooda.

1943 waxaa la oran karaan waa xilliga ugu saxan ee taariikh guntanka booliiska iyo ciidamada qalabka sida ee wadanka. 1960 qaadashadii xurnimada iyo midawgii ka dib ayaa si toos ah loo helay ciidan soomaaliyeed oo hoostaga madaxweynaha wadanka oo ay dadkiisu soo doorteen sida ku cad dastuurka 1960 iyo xeerka dhisida booliiska X.L.2 1972.

Burburkii ka dib waxa ay aasaasidiisu la bibatay, soo noqoshadii dawladnimada soomaaliyeed horaantii 2000, wixii intaan ka dambeeyay hay'adani waxa ay maraysay maraaxil kala duwan iyo duruufo qalafsan oo kala heer ah. 2012 waxa uu dastuurka KMG tibaaxayaa in uu yeelan doono wadanku laba lakab oo booliis ah kan federalka iyo maamul gobleedyada, hawlhooda iyo awoodahoodana ay kala duwanaan doonaan ²⁷.

Booliisku waxa uu masuul ka yahay xasilinta amniga guud ee wadanka. Hay'adani sanadihii dambe waxa ay samaynaysay soo kabasho ay kala simantahay hay'adaha kale ee dawlada sida maxkamadaha iyo wasaaradaha. Waxaa ku biiray dhallinyaro baratay culuumta kala duwan ee sharcigu ka mid yahay fahansana waaqica guud ee wadanka, midaasoo keentay in ay soo laabato sumcadii hay'adda iyo kalsoonidii ay bulshadu ku qabeen.

Inkasta oo ay jiraan caqabado ay sababaan booliisku iyaga oo ka baaqsan kara sida xarig muwaadin oo aan loo marin hanaanka sharciga, hayn aan waafaqsanayn awooda sharci ee hay'ada, wacyi la'aan qaar ka mid ah ciidanka iyo aqoonyari xagga sharciga ahba, hadana waxaa muuqda dadaalo is hufid daaran oo aan la inkiri Karin iyo soo roonaansho maalinba maalinka ka dambeeya sii xoogaysanaysa ²⁸.

Waxaa ciidanka booliiska barbar socda oo ay wadaagaan howlo badan kuwa asluubta oo tariikh ahaan ahaa qeyb ka mid ah ciidanka booliiska soomaaliyeed ²⁹.

Soo kabashada iyo dib u hanashada hawlhoodii sharci waxa ay la wadaagaan ciidamada kale ee ay qeybta ka yihiin, gaar ahaan shaqadooda maamulida xabsiyada ee ay gooni u leeyihiin waxa ay dib ula hana qaaday soo laabashadii dawladnimo ee wadanka ka dib burburkii. Sida ku cad qodobka 26 aad ee dastuurka KMG 2012, waxa ay qeyb ka yihiin ciidamada Qalabka sida.

Intaa ka dib waxa iyadana dhankan laga sameeyay horumar la taaban, waxaa la geliyay waqti badan sidii loo tayayn lahaa, sidaas oo tahay hadana waxa ay caqabado waa weyn la wadaagaan, hay'adaha kale ee dawlada sida booliiska caqabadaha goonida u haysta waxaa ka mid ah; xabsiyada oo yar iyo maxaabiista oo badan, tababar xumi iyo u qalmasho la'aan shaqo, tababarka

²⁷ Article 126 of the Provisional Constitution (4,5) clauses

²⁸ Hills, A. (2014). Somalia works: Police development as state building. *African Affairs*, 113(450), 88-107

²⁹ Law. No. 7 of 30th December 1971

oo aan midaysnayn, hogaanada oo aan isku xirnayn iyo xuquuqdii ay xaqqa u lahaayeen oo aan si dhamaystiran loo helin ³⁰.

3.0 Sookabshada wacyiga Bulshada

Wacyiga guud ee bulshada Soomaaliyeed ee dhanka sharciga waxaa lagu tilmaamaa in uu yahay mid aad u hooseeya, oo aan gaarsiisnayn meel u dhow heerka ugu hooseeya ee qasabka ay tahay in uu soo gaaro. Wacyi la'aantaasi waxa ay sababtay dhibaatooyin badan oo laga baaqsan karay. Waxyaabo isbiirsaday ayaa lagu sheegaa in ay sabab u yihiin wacyi dilnaanshaha haysta bulshada, oo ay ka mid yihiin colaadaha daba dheeraaday ee ka jira wadanka, arrintani waxa ay keentay in bulshadu ay war moog ka noqdaan qaabdhismeedka hay'adaha cadaaladeed ee wadanka iyo gabi ahaanba habka ay u shaqeeyaan kuwa ay maalin laha ugu baahan yihiin oo ka mid yihiin maxkamadaha iyo hay'adaha kale ee kaba sida qareenada iyo xeerilaalinta. Balse waayadan danbe waxaad moodaa in si aan degdeg ahayn loo soocelinayo wacyigaa mudada habowga ahaa, hadaba waxyaabaha sida muuqata uga qeybqaatay soo noolaanshaha wacyiga bulshada waxaa ka mid ah; Baahinta Dacwadaha Maxkamadaha; Kororka Barashada sharciga iyo Baraaruga Bulshada rayidka.boc.

3.1 Koboca barashada Qaanuunka

Kulliyadaha Qaanuunku waxay dower lixaad leh ka qaadanayaan koboca garsoorka iyo horumarkiisa maadaama kulliyadu ay tahay mida saxda ah ee looga shaqeeyo hay'adaha Garsoorka, Burburkii kadib waxaa baba'ay kulliyaddii Qaanuunka ee Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo markaasi ahayd kulliyadda Qaanuun kaliya ee dalka ka jirtay burburkii ka hor, nasiib darro waxa ay ka mid noqotay kulliyadani waxyaabihii uu galaftay dagaalkii sokeeye ee ka qarxay wadanka sanadii 1991.

Burburkii ka hor baraaruga barashada sharcigu aadbay u heer saraysay, wacyiga bulshada ee dhinaca sharciguna waxa uu ahaa mid aad koraya oo la qabsanaya waayaha nololeed ee xawliga ku socda, balse dagaaladii sokeeye ka dib Jaamacadihii dib u bilaabay kulliyada waxaa ku adkaatay in ay arday u helaan, maadaama baraaruga bulshada ama ku dhiirashada iyo muhiimad u arkidoodu ay aad u liidatay, waxyaabaha aadka loo xiiseeyo ee ay diirada waalidiintu saarnayd waxaa ka mid ahaa Caafimaadka iyo injineeriyadda taas oo meesha ka saartay wacyigii sharci ee bulshada.

Wax yaabihii bilowga u noqday wacyi soocelinta sharci ee bulshada waxaa ka mid ahaa, Jaamacadda Muqdisho oo noqotay jaamacadii ugu horaysay ee laga furo caasimada wadanka sanadii 1998, iyada ayaana dib u soocelisay kulliyadii sharciga oo ka mid noqotay afar kulliyadood oo jaamacada lagu bilaabay. kulliyadda Shareecada iyo qaanuunka ee Jaamacadda Muqdisho waxaa ka aflaxay arday tiro fiican oo markaasi ku biiray Hay'adaha Garsoorka, ilaa hadda 2024 waxay jaamacaddu ka mid tahay jaamacadaha ugu fiican ee bixiya kulliyadda.

³⁰ RW Hassan Ali Khayre sanad guurada 49aad ee ciidamada Asluubta muqdisho 2019

Waqtigaa wixii ka dambeeyay jaamacadihii kale ee wadanka laga furay ayaa iyaguna dowladda ka qaatay soo noolaynta kulliyada sharciga, inkasta oo aysan bulshadu xilliyadaa hore aad ugu baraarugsanayn, oo ay kulliyadu ahayd midda ugu liidata ee ay jaamacaduhu bixiyaan, mararka qaarna in arday loo waayo ay jaamacadaaha qaar ka dhigi jireen kulliyada mid lacag la'aan ah ama ardayga isaga lacag lagu siinaayo. Hadana jaamacaduhu way u soo dhabar adygeen oo way joogteeyeen bixinta kulliyadan Jaamacadihii xilliga dhaxe bilaabay bixinta kulliyadan waxaa ka mid ahaa Jaamacadda SIMAD, Banaadir iyo kuwo kale waxa ayna dowlad wayn iska saareen bixinta kulliyada Sharciga, waxa ayna suurogeliyeen in ay garyaqaano badan ka soo aflaxaan kuwaas oo ku shaqeeyay xirfada sharciga ilaa iyo hadana ku shaqeeya.

Jaamacadda ummadda Soomaaliyeed oo dib loo furay burburkii ka dib sanadii 2014 ayaa iyaduna soocelisay kulliyaddii Qaanuunka ee jaamacadda isla markaasna dib u soocelisay Macalimiintii horay wax uga soo dhigaysay kulliyada iyo qaar ka mid ah ardaydii ka aflaxday, si ay kulliyaddu ugu tiirsanaato ilaa ay isku filnaasho ka gaarayso, jaamacaddu waxay soo saartay tan iyo markii dib loo furay, waxaa jaamacadda ka aflaxay tiro badan oo sharciyaqaano ah oo runtii xoog iyo horumarin iyo wax ka badalba ku sameeyay xirfada ku shaqaynta sharciga dhinacyadeeda kala duwan. Minxada Sharciga ee Jaamacadda ummadda Soomaaliyeed waxaa sanad kasta ka faa'idaysta tiro arday Soomaaliyeed ah oo kor u dhaafaya 100 arday, oo isaga kala yimaada dhamaan gobolada wadanka ee ayna jaamacadu xarumaha ku la hayn.

Wali waxaa la dareemayaa in uu aad u hooseeyo wacyiga bulshada ee dhinaca sharciga balse marka loo barbardhigo 10 sano ka hor sida uu ahaa waxaa muuqanaysa in uu kobac samaynayso baraaruga wacyi-sharci ee bulshada soomaaliyeed, waxaana tusaale ku filan tirada ardayda ee aadka u koraysa sanadba sanadka ka dambeeya ee ku biiraysa kulliyadaha sharciga. Mudda ayna waqti badan ka soo wareegan barashada sharcigu waxa ay ka mid ahayd, meelaha aadka u liita ee hadana aan baahida loo qabo lagu baraarugsanayn.

Hadaba sare u kaca ku yimid kulliyadaha qaanuunku waxa ay wax badan ka badashay suuqii sharci ee wadanka, oo isaguna soo kabasho iyo sumcad yeeshay, fursadaha sharci ee jirana waxa ay noqdeen kuwo loo tartamo, oo aqoon iyo xirfad fiicni lagu kala qaato, waxaana arrintan ka markhaati ah in laga soo bilaabo 2019 imtixaan loo galayay fursadaha shaqo ee banaanaada sida kuwa qareenimo, Garsooranimu iyo xeer-ilaaliyeba.

Kobaca jira waxaa markhaati ka ah in 50 boos oo garsoornimo iyo xeerilaaliye heer federaal ah ay u fariisatay in ka badan 410 Garyaqaan, kuwii ka horeyayna ayna tirade imtixaanka ka soo qeybgasho gaarayn 100 qof sida kii 2020 oo ay 21 boos oo garsooranimu u tartameen tiro aan ka badnayn 50 shakhsi taas oo cadayn cad u ah kobaca garyaqaanada iyo wax soo saarka kulliyadaha qaanuunka ee jaamacadaha dalka.³¹ Sidoo kale waxaa sare u kacay qoridda buugta ku saabsan Qaanuunka oo markii hore ay adkayd in la helo buugaag ku qoran afka hooyo oo ku saaban sharciga iyo Qaanuunka. 10-kii sano ee u dambeeyay waxaa la soo saaray buugaag kor u dhaafaysa

³¹ <https://www.facebook.com/share/p/WjrjhufNDdLMGBt1/?mibextid=WC7FNe>

ilaa 10 buug oo ay qoreen garyaqaanada kala duwan kuwaas oo qayb lixaad leh ka qaatay dhisidda aqoonta iyo wacyiga bulshada.

3.2 Doorarka Ururada Bulshada.

xiliyadii dagaaladii aduunka ka dib, bulshado rayidka ah ayaa sii kordheysay isla markaana noqotay mashiinada aasaaska u ah nabad-dhisidda iyo xallinta khilaafaadka gaar ahaan tan iyo markii la aasaasay Ajendaha Qaramada Midoobay ee nabadda ee 1992-kii oo u aragtay bulshada rayidka ah in ay ka cayaarayaan dowlad badan oo ay ku leeyihiin geedi socodka Nabadda.

Horumarka dunidan Casriyaysan, Bulshada Rayidka ah waxay la jaar noqdeen Qayimka Guud (Universal Values) sida Dowlad wanaaga, Xuquuqda aadanaha, dimuqraadiyadda. Ururada Bulshada waxay kamid noqdeen wadahadalada caalamiga ah iyo kuwa gobolka ah ee looga hadlayo arrimaha muhimka ah.³²

Ka dib burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya 1991, ururada bulshada rayidka ah (CSOS) waxay u tillaabsadeen inay buuxiyaan hamigii dowladnimo iyo sidoo kale bixinta adeegyo muhiim ah. Ururada bulshada Waxay cayaareen doorar dhowr ah oo muhiim ah – laga bilaabo taageeridda nabad dhisidda iyo ka hortagga colaadaha ilaa kor u qaadida dimuqraadiyeynta iyo bixinta gargaarka bani'aadamnimada. Xitaa tan iyo markii ay soo noqotay dowladii dhexe ee Soomaaliya oo shaqeyneysa 2012, Ururada Bulshada Rayidka ah ayaa sii waday inay muujiyaan qiimahooda sida fududaynta, u doodidda hal-abuurka cusub iyo kormeerida doorashooyinka.³³

Markii ay Soomaaliya bilawday kasoo kabashada burburkii lixaadka lahaa ee soo gaaray waxaa adkaatay in la dhiso garaadka bulshada iyada oo loo marayo dhanka waxbarashada, wacyigelinta iyo isdhexgalka bulshada (Social interaction) inkasta uu ahaa mid aad u liitay hadana waxa si tartiib tartiib ah uu ula soo kowsanayay nidaamka dowliga ah ee dalka ka jiray.

Ururada bulshada waxaa lagu tiriyaa matalayaasha iyo u dhaqdhaqaaqaha arrimaha bulshada waxay qayb wayn ka qaataan dowlad dhiska, nabadaynta, horumarka iyo kobcinta dhaqaalaha.

In ka badan 60 urur ayaa lagu xusay warbixinta UPRR oo la daabacay may 2015, waxaana warbixinta ku qoran 64 urur oo ka hawl gala Dalka Soomaaliya, warbixintaasi waxaa lagu xusay urur walba iyo hawlaha uu qabto iyo sifadiisa, ururada intooda badan mid waliba wuxuu u taaganyahay shaqo u gaar ah, ururada warbixinta lagu xusay ayaa waxaa kamid ah urur u dooda xuquuqda dadka baahiyaha gaarka ah qaba, ururo kale oo waxaa jira u dooda xuquuqda haweenka, kuwo udooda xuquuqda aadana. Marka waxaa halkaas ka cad dowlad ururada bulshada ee u ololeynta Cadaaladda iyo dowlad dhiska.³⁴ Ugu dambayn hawl galada ururada bulshada waxay

³² Abdiwahid A.Ahmed, Nov.2020- the Role of Civil Society in Peace Building in Somalia.

*[The Role of Civil Society in Peace Building in Somalia \(rsisinternational.org\)](https://rsisinternational.org/)

³³ Feisal Osman, June 2018-The Role of Civil Society in Somalia's Reconstruction: Challenges and Opportunities.

[The Role of Civil Society in Somalia's Reconstruction: Challenges and Opportunities | Somali Observatory for Humanitarian Affairs \(sooha.org\)](https://sooha.org/)

³⁴ Universal periodic review Report, may 2015.

[JS5 UPR24 SOM E Main \(1\).pdf](#)

sumad wanaagsan u yihiin kororka iyo koboca dowladnimada waxayna kaalin wayn ka gaysanayaan u ololeynta Cadaaladda Bulshada.

4.0 Caqabadaha haysta Hay'adaha Garsoorka;

Caqabadaha haysta Hay'adaha garsoorka waxaan u qaybinaynaa laba qayb oo kala ah; caqabado laga gaabiyay iyo caqabado ay duruuftu iyo waqtigu uu keenay. Hadaba caqabadahaasi waxaa kamid ah;

- **Maqnaashaha golaha Adeega Garsoorka;** sida ku xusan qodobka 2aad ee sharciga lagu dhisay golaha adeega garsoorka 2014, goluhu wuxuu u xilsaaranyahay xaqiijinta madaxbannaanida iyo dhedhexaadnimada Garsoorka heerka Dawladda Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Makamadda Dastuurka; Maamulka Garsoorka oo ay ka mid yihiin shaqo qorista, ruqseynta iyo tallaabo sharci ka qaadista liddka ku ah Garsoorayaasha makamadaha heerka Dawladda Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka³⁵. 16-november 2020 ayuu wasiirkii cadaaladda cabdulqaadir maxamed nuur uu baarlamaanka horgeeyay ansixinta 7 xubnood oo kamid noqonaya golaha adeega garsoorka, isla markaasna ay ansixyeen baarlamaankii xiligaas, nasiibdarro se ma ayna shaqogalin ilaa iyo hadda. Hadaba hawlo intaas kabadan ayaa loogu talagalay in uu golahani uu qabto, maqnaashiyahiisana waxay caqabad mug leh ku noqotay habsami u socodka hawlaha hay'adaha Garsoorka.
- **Madax banaani la'aanta Garsoorka;** cadaaladda waxaa sal u ah garsoor madaxbanaan, faro-gelinta garsoorka waxay lixaad tiraysaa hufnaanta cadaaladda, sida lagu xeeriyay qod.106aad ee DKM, garsoorku wuu ka madaxbanaanyahay laamaha dawladda ee sharci dajinta iyo fulinta, marka ay gudanayaan xilkooda, xubnaha garsoorkuna waxay u hogaamsamayaan kaliya sharciga.³⁶ Sida ku xusan heshiiska ICCPR ee 1966 wuxuu adkaynayaa muhiimadda madaxbanaanida garsoorka waana in garsooreyaashu ay u madaxbanaanaadaan hawlhooda si xuquuqda bulshada ayna u marinhabaabin.³⁷ Si taas lamid ah mabaadi'a Bangalore(Bangalore Principles) ee anshaxa garsoorka qodobkiisa koowaad wuxuu xeerinayaa madaxbananshiyaha garsoorka iyo in lagu faro galinkarin hawlihiisa kaliya uu u hogaamsamo sharciga. Cilmi-baaris kala duwan ayaa lagu sheegay in culays badan uu ka jiro dhanka madaxbanaanida ee hay'adaha garsoorka
- **Dhaqaalo yarida hay'adaha Garsoorka:** Hay'adaha Garsoorka ayaa saluug badan ka muujiyay miisaaniyadda ay dowladu u qoondaysay hay'adaha garsoorka, waxayna sheegeen in ayna kaafinaynin baahida hay'ada. War murtiyeedkii shirkii garsoorka ee sanadii 2022 ayaa qodobkiisa 3aad waxaa lagu sheegay in miisaaniyadda ay dowladu u qoondaysay hay'adaha garsoorka ayna dabooli Karin baahida garsoorka iyo hawlaha ay bulshada ka filayso loona baahanyahay in dib loo qiimeeyo.³⁸ Caqabadani waxay halis ku

³⁵ Qod.2aad sharciga dhisidda golaha adeega Garsoorka, 2014.

³⁶ Qod.106 DKM, Aug, 2012.

³⁷ Heshiiska QM ee ICCPR, 1966.

³⁸ War-murtiyeedka shirka garsoorka 2022.

tahay habsami usocodka hawlaha garsoorka waxaana suuro gal ah in xubnaha hay'addu ay ku kacaan musuq iyo wax-isdaba marin. Sida lagu xusay machadka Hoover institution, hay'adaha garsoorka ee sida hufan u shaqeeya waa kuwa leh isku filnaasho dhaqaalo ³⁹.

- **Maqnaashaha maxkamadda Dastuurka:** Maxkamadda dastuuriga waxaa lagu aasaasay qodobka 109B ee DKM, maxkamadani waxaa la siiyay hawlo muhim ah oo ay ugu horeeyaan go'aan ka gaarista kiisaska ku saabsan arrimaha dastuurka sida ku xusan isla qodobka 109C. maqnaashaheeda wuxuu sababay in si ba'an loogu tunto dastuurka isla markaasna la caadaysto. Sida uu sheegay wasiirkii cadaaladda mudane cabdiraxmaan xoosh jibriil, bartamihii 2013 ayaa la damacsanaa in la yagleelo maxkamad dastuuri ah si looga baaqsado in lajabiyo dastuurka qabyada ah ee curdaanka ah, balse duruufo badan oo ku geedaamanaa awgeed waxaa hawshaas si KMG ah loogu igmaday Maxkamadda sare ee dalka. Waxaa caqabad wayn ah in muddo ka badan toban sano lagu guulaysan la'yahay in la dhiso maxkamadan muhimka ah isla markaana hawlihii ay qaban lahayd la siiyo maxkamad kale, taas oo noqotay caqabad kamid ah kuwa haysta garsoorka.
- **Fulin la'aanta Xukunnada Maxkamadaha.** Qareen cabdullahi maxamed (dudaaye) oo ka hadlaya kororka dilalka ayaa sheegay in dilalka ay gaysanayaan dadka rayidka ah ay sii badanayaan, qareenku wuxuu taasi ku macneeyay fulin la'aanta xukunnada dilka ah ee maxkamadaha rayidka ah.⁴⁰ Gudoomiyaha Maxkamadda Sare ee Puntland oo ka hadlaya Shirka sanadeedka Garsoorka Dalka ee sanadka 2024 ayaa sheegay in caqabadda ugu waynee haysata garsoorka Puntland ay tahay fulin la'aanta xukunnada taas oo uu u sababeeyay in ay tahay hubka ku jira Gacmaha aan sharciga ahayn.⁴¹ Si lamid ah gudoomiyihii maxkamadda racfaanka gobolka banadir maxamed cusmaan baari oo ka hadlayay shir u dhexeeyay hay'adaha amniga iyo garsoorka ayaa sheegay in caqabadda ugu waynee garsoorka haysata ay tahay fulin la'aanta xukunnada maxkamadaha kasoo baxa iyo awaamirtooda, hay'adaha booliska ayuuna ku dhaliilay arrintaasi.⁴² horrintii bishii febraayo 2021, gudoomiyaha maxkamadda sare ee dalka mudane baashi yusuf axmed ayaa diginin u diray hay'adaha dowladda, laamaha amaanka iyo dowladaha hoose, wuxuuna sheegay in ay ciqaab ka dhalan doonto fulin la'aanta xukunnada maxkamadaha kasoo baxa.⁴³
- **Wacyiga hoose ee bulshada:** Bulshada soomaaliyeed waxaa saamayn xooggan ku yeeshay burburkii dalka soo gaaray, waxaa lumay wacyigii iyo baraarugii bulshada, taas oo lagu sababayn karo dagaaladii dabadheeraaday iyo cadaalad darradii wadanka ku habsatay.
- **Dib u eegis la'aanta sharciyada muhimka ah ee dalka:** Xeearka soomaaliya wax dib u eegis ah laguma samayn tan iyo markii la curiyay burburkii ka hor ama lixdamaadkii, taas oo dhibwayn ay ku qabaan maxkamadaha dalka, waxay xuseen in xeerarkaasi ayna la jaanqaadi Karin waaqica manta jira. Wasiirka cadaaladda mudane xasan macalin ayaa

³⁹ Judicial corruption in developing countries, by Edgardo buscaglia, July-1999.

⁴⁰ Gaabiska xafiiska xeer-ilaaliyaha guud iyo kaalinta u uku leeyahay kororka dilalka, Qareen dudaaye, feb-2024.

⁴¹ Xassan Yuusuf Nuur, jan, 2024

⁴² <https://www.facebook.com/dalsantv/videos/4292891380770351/?vh=e&mibextid=WC7FNe>

⁴³ <https://www.facebook.com/share/uC6ameMFGhGducnm/?mibextid=WC7FNe>

sheegay in nidaamkii dowladnimo ee soomaaliya ka jiray tan iyo xurnimadii uusan muhiimad wayn siinin garsoorka, xeerarkeena waxaa inta badan la sameeyay lixdamaadkii, waxayna u baahanyihiin in dib u habayn aynu ku samayno si ay ula jaanqaadaan casriga lajoogo.⁴⁴

⁴⁴ Wasiir xasan macalin, shir sanadeedka garsoorka dalka, 2023.

5.0 Gunaanad

Garsoorka waa tiir kamid ah tiirarka 3da ah ee ka koobantahay dawladda casriga ah, Garsoorku waxa uu u taaganyahay xaqiijinta sarraynta sahciga, dhowrista isku dhaqidda xeerarka, ilaalinta xuquuqaha aasaasiga ah, dheelitirka hay'adaha dowladda, xalinta khilaafaadka iyo talaabo ka qaadida cidkasta oo jebisa sharciga. Yoolka Garsoorka waa in uu ku suntanaado hufnaan, sinnaan, daacadnimo, tayo adeeg-bixin, ixtiraamka xuquuqda aasaasiga ah iyo xaqiijinta sarraynta sharciga.

Markii maagalada Carta ee dalka Jabuuti dib loogu yagleelay Jamhuuriyaddii Saddexaad ee Soomaaliya sanadkii 2000, waxa la dajiyey Axdi-Qarameed Kumeelgaarka ah oo ay isku raaceen waftidii shirkaa taariikhiga ah ka soo qaybgashay, waxaana si wada jir ah loogu baaqay in dib loo dhiso hay'ad garsoor oo madax-bannaan.

Horaantii 2004 ayaa loo badelay nidaamkii guud ee dawlada dhexe mid federal ku meel gaar ah, balse caqabadihii haystay hay'ada garsoorka wax weyn kamay fududayn, in ay xukuumadihii isbedbadalayay soo kordhiyeen culaysyo hor leh mooyee, sida xarigii gudoomiyihii maxkamada sare oo tusaale u ah xaalada aadka u liidatay ay laanta garsoorka wadanku la dhibaatoonaysay xilligaa iyo aragti yaradii ka haysatay xukuumda nidaamka cadaaladeed ee wadanka⁴⁵.

Caqabadahan markii laga soo tago horaantii sanadii 2014 waxa ay ahayd sanad ay isbadalo xoogan ku dhaceen garsoorka wadanka, sanadan waxaa xoogaystay oo yeeshay barbilow hagaagsan garsoorka caasimada wadanka oo u taagan in uu yahay garsoorka guud ee wadanka maadaama ay halkan ku shaqayso maxkamadii sare ee wadanka oo iyadu metelayso garsoorka wadanka oo idil⁴⁶.

Dhanka maamulada marka laga soo tago Somaliland, Garsoorka Dowlad gobaleedka Puntland ayaa ah mid waqti fog la aasaasay, oo ka horeeyay dhammaan Dowlad Goboleedyada kale ee dalka, Puntland waxa ay jirtaa 26 sano iyo dheeraad, marka la eego habshaqaynta garsoorka maamulka, waxaad ka dheehan kartaa in mudadaas ay jirtay Puntland lagu qabtay wax badan oo aan sahlanaayn.

Dhanka kale waxaa jira guulo la xusi karo oo ay samaysay hay'adda garsoorka ee wadanka oo ay ka mid yihiin, hirgelida iyo shaqaynta maxkamadaha si dhamaystiran, hawl-gelida dhallinyaro aqoonyahano ah oo firfircoon, wacyiga bulshada oo soo kab maya, Kobaca barashada Qaanuunka iyo ka faa'iidaysiga baraha isgaarsiinta, kobaca xirfadeed iyo aqooneed ee hawl-wadeenada hay'adda iyo arimo kale oo muhim ah ayaa saldhig u ah kobaca Hormarineed ee Garsoorka Wadanka.

⁴⁵ Transitional Federal Charter. (2004). Article 63. Mogadishu.

⁴⁶ Bashir, Y. (2025). *Impediment hindering establishment of Somalia's JSC*. *Journal of International Law ESS*.

6.0 Talabixin

Dowladaha Afrikada waxay kusoo caano maaleen Cadaaladda Kumeel gaarka ah (العدالة الانتقالية) ee loogu talagalay in xaalad ama xilli looga gudbo, loogu talagalay in dalalka colaadaha ka soo kabanaya oo ay Soomaaliya ku jirto isla markaasna ay ku soo caanomaashay xilligii yagleelidda jamhuuriyaddi 3aad. Kobaca Cadaaladda waa martabado ay Dowladuhu maraan taas oo qeexaysa horumarka ay samaynayaan hay'adaha Garsoorka iyo Cadaaladda. Daraasadani waxay ku talinaysaa;

- **Baahinta Adeega Garsoorka:** waa in adeega Cadaaladda iyo Garsoorka la gaarsiiyaa dhammaan deegaanda dalka, gaar ahaan deegaanadii dhowaan la xoreeyay ee gacanta dowladda ku jira isla markaana loo sameeyaa wacyigelin iyo toosin. Waxaa si wayn aad uga bogan kartaa cilmi baaristii uu sameeyay Dr Axmed khayre jan, 2022-Baahinta Adeega Garsoorka.
- **Tayaynta Hawl-wadenada Hay'adaha Garsoorka:** waa in diiradda la saaro tayaynta hawl-wadeenada garsoorka gaar ahaan Garsooreyaasha iyo Xeer-ilaaliyeyaasha isla markaana lagu kormeero hawlaha ay hayaan, tayaynta hawl-wadeenada garsoorka waxay udubdhexaad u tahay kobaca hay'adda iyo ka dhabaynta yoolka garsoorka.
- **Dhisidda Golaha Adeega Garsoorka:** waa in si dhaqsi ah loo hirgaliyo Golaha Adeega Garsoorka oo ah Gole muhim u ah Hay'adda la'aantiisuna ay habaabayaan hawlo badan oo muhim ah, goluhu wuxuu qabtaa hawlo badan sida ku xusan qodobka 5aad ee sharciga dhisidda Golaha Adeega Garsoorka ee la meel mariyay 30-juun, 2014.
- **Wacyi gelinta bulshada:** maadaama wacyiga bulshada ee ku kalsoonaanta Garsoorka iyo Cadaaladda Hay'adaha Garsoorku uu soo kabanayo waa in hay'addu ay mas'uuliyad iska saarto sidii bulshadu ay u heli lahaayeen wacyi gelin joogta ah, taas oo sahlaya kaabidda fahamka bulshada iyo ka digtoonaanta arrimaha sharciga baalmarsan.
- **Kordhinta miisaaniyadda Garsoorka:** waxaa jira cabasho badan oo ay qabto Hay'adda garsoorka oo ku aadan dhanka miisaaniyadda Dowladda, oo ay hay'addu sheegtay in ayna hay'addu helin miisaaniyad ku filan, taas oo wiiqi karta hawlaha hormarined ee ay hay'addu u hayso bulshada.
- **Taageeridda Machadka Tababbarka Garsoorka:** maadaama Machadku uu kaalin wayn ka gaystay tayaynta garsoorka mudadii gaabneed ee uu jiray, daraasaddu waxay ku talinaysaa in la taageero Machadka tababbarka isla markaasna loo dhamaystiro dhamaan adeegyada uu u baahanyahay.
- **Taageeridda Waxbarashada dadweyne:** horumarin in lagu sameeyo waxbarashada gaarka ah waxa ay hay'adahan ka caawin kartaa helista hawl-wadeeno firfircoon oo fahansan baahida iyo xalka caqabad kasta oo la gudboonaata, halkaas oo ay ka dhalandoonto in la helo hay'ado cadaaladeed oo horumarsan si hufanna ugu adeega bulshada, hantana kalsoonidooda iyo aaminaada dadweynaha.

Tixraac

Books

3. The legal system of Africa Series, general auditor Kenneth R. Redden and others
4. The legal system of the Somali Democratic Republic by Haji N. A. Noor Muhammad
5. Book of legal clinic manual author Birmad Egal at the Mogadishu University Legal Clinic
6. The Somali legal systems. (1972). *The legal system of the Somali Democratic Republic*. Virginia, USA: The Michie Company

Articles / Reports / Academic Papers

2. Bashir, Y. (2025). *An impediment hindering the establishment of Somalia's JSC*. Journal of International Law ESS
3. *Habka Nidaaminta Garsoorka Somaliya*, Somalia Public Agenda, May-2018
4. *Justice-Report-Jan-6*. (2021). Mogadishu: Heritage Institute for Policy Studies
5. Heritage Institute (2021). *Dib u Dhiska Nidaamka Cadaaladda Soomaaliya ee Burburay*
6. UNISOM (10 Sep 2015). *Maxkamadda Gobolka Benadir Oo laga furay Muqdisho*
7. UNSOM (4-May 2015). *Somalia's First Female Prosecutors Change the Face of Justice*
8. La warayste, April 2024 (appears to be interview-based)
9. Imtixaanka Ogaal Legal Syndicate, 11 Sep 2019
10. Salim Saed (2018). *The State of Judiciary in Puntland State of Somalia*
11. *Human Rights Security within the Criminal Justice System in Puntland: The Case of Bosaso, Garowe, Galkacyo and Qardho Districts* (2018)
12. Somali Public Agenda (2018). *Habka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya*
13. Sharciga lagu aasaasay Machadka Tababbarka Garsoorka, 2021 (institutional report)
14. Warbixinta Machadka Tababbarka Garsoorka, Jan 2022
15. Hills, A. (2014). *Somalia works: Police development as state building*. African Affairs, 113(450), 88-107
16. RW Hassan Ali Khayre, sanad guurada 49aad ee ciidamada Asluubta, Muqdisho 2019 (speech/statement)
17. Abdiwahid A. Ahmed (Nov. 2020). *The Role of Civil Society in Peace Building in Somalia*
18. Feisal Osman (June 2018). *The Role of Civil Society in Somalia's Reconstruction: Challenges and Opportunities*
19. *Universal periodic review Report*, May 2015
20. Qod.2aad sharciga dhisidda golaha adeega Garsoorka, 2014 (report form)
21. *War-murtiyeedka shirka garsoorka 2022*
22. Buscaglia, E. (July 1999). *Judicial corruption in developing countries*
23. *Gaabiska xafiiska xeer-ilaaliyaha guud iyo kaalinta uu ku leeyahay kororka dilalka*, Qareen Dudaaye, Feb 2024
24. Xasan Yuusuf Nuur, Jan 2024
25. Wasiir Xasan Macalin, *shir sanadeedka garsoorka dalka*, 2023

Websites

24. Facebook post link
25. <https://www.kaalo.org/wp-content/uploads/2019/04/Baseline-Study-FINAL-7.pdf>
26. <https://somalipublicagenda.org/hababka-nidaaminta-garsoorka-soomaaliya/>
27. Facebook post link
28. Facebook post link
29. The Role of Civil Society in Peace Building in Somalia (rsisinternational.org)
30. The Role of Civil Society in Somalia's Reconstruction (sooha.org)
31. JS5_UPR24_SOM_E_Main (1).pdf (*online report*)
32. ICCPR text online
33. Facebook video link
34. Facebook post link
35. Duplicate entry of #1 online source (Transitional Federal Charter link if available)

Qodobada sharciyada

1. Transitional Federal Charter (2004), Article 63
2. Law No. 5 of January 31st, 1961
3. Transitional Federal Charter (2004), Article 63 (*duplicate*)
4. Articles 105–109 of the Provisional Constitution
5. Article 126 of the Provisional Constitution (clauses 4,5)
6. Law No. 7 of 30th December 1971
7. Qod.2aad sharciga dhisidda golaha adeega Garsoorka, 2014 (*also a report context*)
8. Qod.106 DKM, Aug 2012
9. ICCPR, 1966 (*international treaty*)